# Muwaadinimada iyo xuquuqda shaqada

Iyadoo shardi u ah u-qalmitaanka gunnooyinka caymiska shaqo la'aanta, qawaaniinta federaalka ayaa u baahan in codsade kasta caddeeyo ciqaabta been abuurka ah inuu isagu ama iyadu tahay muwaadin ama muwaadin Mareykan ah ama qof aan ahayn muwaadin ama muwaadin Mareykan ah waa inuu soo bandhigaa dukumentiyada diiwaangelinta shisheeyinimo si loo xaqiijiyo in isaga ama iyadu loo oggol yahay inay ka shaqeeyaan Mareykanka

Waaxda Amniga Shaqada (Employment Security Department, ESD) ayaa xaqiijineysa heerka socdaalka shaqsiga iyadoo loo marayo isku xirnaanta Nidaamka Shisheeyaha ee marxalada Xaq u-lahaanshaha (Systematic Alien Verification for Entitlements, SAVE). Barnaamijka SAVE waxa maamusha waaxda muwaadinimada iyo adeega socdaalka Maraykanka ee (U.S. Citizenship and Immigration Services, USCIS).

**Hadii aanan ahayn muwaadin Maraykan ah, ma codsan karaa gunnada shaqo la'aanta?**

Haa, dadka aan u dhalan maraykanka ama muwaadiniinta Maraykanku waa ay codsan karaan gunnada shaqo la'aanta. Waa inaad u keentaa waaxda dhukumentigaaga shisheeyenimo si loo cadeeyo aqoonsigaaga socdaalka/ soogalootinimada. Dukuntiyadan sida caadiga ah waxa la keenayaa xiliga codsiga. Haddii aadan awoodin inaad keento macluumaadka marka lagu guda jiro codsiga, waxa lagaa codsan doonaa inaad keento markaas ka dib.

**Maxaa la is waydiinayaa xiliga codsiga?**

Haddii aad cadayso inaanad ahayn muwaadin Maraykan ah waa lagu waydiinayaa

- Sharci ahaan xaq ma u lahayd inaad ka shaqeyso Mareykanka 24-kii bilood ee la soo dhaafay? iyo,
- Waa maxay dukumintiga ugu dambeeya ee socdaal ee aad haysato?
    - I-327 Ogolaanshaha dib u soo galidda (I-327 Reentry Permit)
    - I-551 Kaadhka deganaanshaha rasmiga ah (I-551 Permanent Resident Card)
    - I-571 Dukumentiga socdaalka ee qaxootiga (I-571 Refugee Travel Document)
    - I-766 Kaadhka ogolaanshaha shaqada (I-766 Employment Authorization Card)
    - I-94 Diwaanka bixitaanka iyo soo galidda (I-94 Arrival/Departure Record)
    - I-94 diwaanka imaanshaha iyo tegitaanka ee Basaboor shisheeye oo aan dhicin wali

  - Fiisaha socdaalka
  - Tiimaha I-551 oo ku meel gaadh ah (oo ku taala baasaboor ama I-94)

**Waxaan haystaa diwaanka I-94 ee imaanshaha iyo tegitaanka ee Basaboor shisheeye oo aan dhicin wali. Maxaa la iiga baahan yahay si aan u soo galo?**

Haddii aad haysato I-94 diwaanka imaanshaha iyo bixitaanka ee Basaboor shisheeye oo aan dhicin wali, waxa lagaaga baahaynayahay in aad galiso kuwan soo socda.

- Lambarka Baasaboorkaaga
- Lambarkaaga I-94, iyo
- Taariikhda uu dhacaayo

**waxaan haystaa diwaanka I-94 ee imaanshaha iyo bixitaanka ee Basaboor shisheeye oo aan dhicin wali, laakiin malaha taariikhda uu dhacayo Maxaan ku soo galayaa markaa?**

Haddii aad haysato Diiwaanka Imaatinka / Tagitaanka I-94 ee dukumintiga socdaalka ee Baasaboorka Ajanabiga ah oo aan dhacsanayn, laakiin aadan haysan taariikhda dhicitaankiisa, sababtoo ah mudadaada gelitaanka waxaa shaabadeeyay Waaxda Amniga Gudaha (Department of Homeland Security) inta lagu jiro joogista (Duration of Stay, D / S), waad keeni kartaa taariikhda la bixiyay I-94 ama taariikhda soo gelitaanka, halkii aad ka sheegi lahayd taariikhda uu dhacayo.

Haddii aad wali hayasato Baasaboor sax ah, waxaan galin kartaa taariikhda uu dhacayo Baasaboorkaagu.

Hagitaankan waxa bixiyay waaxda amaanka gudaha ee maraykanka.

**Maxaan samaynayaa haddii aanan haysan I-94?**

Haddii aanad haysan nuqul ka ah I-94 kaaga, waxaad booqan kartaa waaxda amniga gudaha si aad u hesho nuqul Elektaroonig ah halkan.

Haddii aadan heli karin nuqul elektiroonig ah oo ah lambarkaaga I-94, waxaad codsan kartaa nuqul koobi halkan

**Waxaan ahay shaqaale aan dhukumenti haysan Miyaan xaq u leeyahay gunnooyinkaas?**

Waa inaad haysataa rukhsad aad kaga shaqeysid Mareykanka si aad xaq ugu yeelato guunooyinka shaqo la'aanta iyo ballaarinta dheefaha shaqo la'aanta sida uu dhigayo Sharciga Gurmadka, Caawimaada, iyo Ilaalinta Dhaqaalaha ee Korona Fayras (Coronavirus Aid, Relief, and Economic Security Act, CARES). Si kastaba ha noqotee, ma tixgelinayno xaaladda socdaalka marka aan tixgelinayno u-qalmitaanka barnaamijka gobalka ee Fasaxa Mushaarka lagu qaato ee Qoyska iyo Caafimaadka (Paid Family and Medical Leave). Markaa haddii aad si daran u xanuunsanayso, ama aad daryeelayso qof xanuunsanaya barnaamijkani waxa laga yaabaa in uu ku caawiyo Waxbadan ka ogow paidleave.wa.gov or tometiempo.org.

**Helitaanka shaqo la'aanta ama Gunnooyinka Fasaxa Qoyska / fasaxa Caafimaadka ay khatar gelineysaa awooddeyda inaan ku codsado kaarka cagaaran ama muwaadinnimada sida ku xusan xeerarka cusub ee lacag-bixinta dadweynaha?**

Maya. Caymiska Shaqo La'aanta iyo Gunnooyinka Fasaxa Qoyska iyo fasaxa Caafimaadka laguma daro go'aanka khidmadda dadwaynaha.

Employment Security Department (Waaxda Amaanka Shaqada) waa barnaamij/shaqo abuure baxsha fursad loo siman yahay. Taageerooyinka kaalmaatiga iyo adeegyadu waa diyaar markii ay codsadaan shaqsiyaadka naafada ah. Adeegyada caawimaada luuqada ee dadka aan si fiican u aqoon luuqada Ingiriiska ayaa si bilaash ah lagu helayaa. Adeegga Dhagoolayaasha Washington: 711